

# Maxaa laga wadaa Gudniinka Gabdhaha (FGC)?

## Hooyooyinka iyo Gabdhaha

Waxaa dhici karta in aad garanaysiin gudniinka gabdhaha (FGC) sababtoo ah waxaad adiga nafsadaada lasoo kulantay gudniinka ama waxaaba lagu sameeyay gudniinka hooyadaada ama qof kale oo dumar ah oo aad qaraabo tiiin ama saaxiibadaada aad isku jaaliyada tiiin. Buuggaan waxaa loogu yeeraa Gudniinka Gabdhaha (FGC), laakiin jaaliyadaada waxaa laga yaabaa in ay u yaqaanaan wax kale sida gudniinka dumarka, sunna, tahara, khitan, ama khatna. Sida aad ogtahay, Gudniinka Gabdhaha waxaa kamid ah daloolin, gooyid, saarid, ama tolid xirid lagu sameeyo dhammaan ama qayb kamid ah xubnaha taranka dumarka dibada ah. Gudniinka Gabdhaha waxaa lagu sameeyaa dhaqamo kala duwan waxaana sameeya qomwiyado kala duwan oo adduunka oo dhan ah.

Jaaliyadaada waxaa dhici karta in ay leedahay dhaqan Gudniinka Gabdhaha ah oo muddo dheer ah. Dadka qaar waxay u sameeyaa Gudniinka Gabdhaha si ay kor ugu qaadaan dhawrsanaanta ama u ilaaaliyaan awooda gabadha. Dadka qaar waxay u arkaan qaab loogu garto gabadhu in ay qaan gaartay. Jaaliyado kale waxay aaminsanyihiin in ay midaasi diintoodu amrayso. Qoysaska keligooda ah, go'aanka wuxuu noqon karaa mid ku dhisan waxyaabaha ay dhaqan ahaan u aaminsanyihiin, sababo dhaqaale, ama cadaadis xoogan oo uga yimaada dhinaca qoyska ama saaxiibada. Qaar kamid ah qoysaska waxay ka cabsadaan haddii aan gabadhooda la gudin, in laga takooro gudaha jaaliyada oona hadhow la guursanin. Si kastaba, dhammaan gabdhaha oo dhan waxay mudan yihiin in la guursado oona noqdaan lammaane wanaagsan sidoo kale dhammaan gabdhaha oo dhan, ayada oo aan la eegaynin xaaladooda, waxay mudan yihiin in lagu ixtiraamo gudaha jaaliyadooda—xitaa kuwa diidayo Gudniinka Gabdhaha.

Sida ayba tahay dhaqan kasta, dhaqamada iyo caadooyinka waa kuwo isbedela muddo dheer kadib. Intiiba ay bulshadu sii horumarayso waxna baranayso, way isbedelayaan. Tusaale ahaan, dad aad u yar oo adduunka ku nool ayaa caba sigaarka maanta marka loo fiiriyo tobanaan sanno kahor sababtoo ah waxaynu baranay waxyaabaha ku saabsan dhibaatooyinka uu leeyahay sigaarka. Gabdho baddan oo adduunka ku noolna waxay dhigtaan iskuulo sababtoo ah waxaynu baranay faa'iidata ay ugu leedahay waxbarashada dhammaan gabdhaha iyo wiilashaba gudaha bulshadeena.

Fikradaha dhaqameed ee ku saabsan Gudniinka Gabdhaha waa kuwo sidoo kale isku bedelaya gudaha jaaliyadaha qaarkooda. Tusaale ahaan, dalka Kenya, Gudniinka Gabdhaha wuxuu u yaraanaya si aad u xoogan, kumanaan gabdho iyo dumar ahna waxay dooranayaan dhaqamo kale oo bedel ah maadaama ay barteen halista uu leeyahay gudniinka gabdhaha. Maadaama aad lasoo kulantay Gudniinka Gabdhaha oona jaaliyadaada iyo qoyskaaga aaminsanyihiin in la sameeyo gudniinka, waxaa dhici karta in aad doonaysid in gabadhaadana lagu sameeyo Gudniinka Gabdhaha ama waxaa dhici karta in aad si xoogan uga horjeedo. Halka gudniinka laf ahaantiisu uu dhibaato ku yahay jirka iyo caafimaadka nafsi ahaan ee gabdhaha iyo dumarka, haddana dhaqanka ah in la sameeyo wax lagu garto in ay gabadha qaan gaartay waa mid gaar ah waana waxa ay khasab tahay in lasii wado si loogu dabaal dego loona soo dhoweeyo ayada oo aan la samaynin Gudniinka Gabdhaha. Intiiba aad akhrinaysaan buuggyarahaan, waxaynu ku rajo weynahay in aad ka wada hadashaan bedelada lagu bedelayo samaynta Gudniinka Gabdhaha.

